# Dhexdhexaadinta Waxbarasho Gaarka ah

## Tilmaamta Waalidiinta Caruurta & Dhalinyarada (Da'da 3-21)

Daabacaadani waxay kamid tahay taxane Individuals with Disabilities Education Act, IDEA (Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Laxaadka La') ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka. Tilmaamaha waalidka ee taxanahan waxaa kamid ah:

Dhaxdhaxaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Gobolka ee Loo Qoray Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Nidaamka Aan Dhamaanin ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabyada Dhagaysiga IDEA
Kulamada Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA

CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

*Daabacaadan waxay sharaxaysaa Cabashooyinka Nidaamka Socda/Dalayada Dhagaysiga guud ahaan Qaybta B ee IDEA. Looguma talo galin inay ka turjunto, waxka badasho, ama badasho wixii nidaam ilaalin ah ama waajib sharciga federalka ama gobolka ah.*

## Waa maxay dhex dhexaadintu?

Dhex dhexaadinta waa nidaam cid iskeed isku xilqaanto taas oo dad ay iskugu keento si ay meesha uga saarto ismaandhaaf kadhax jira. Dhex dhexaadintu waxay ka caawisaa ka qayb galayaa inay wada hadlayaan, si uu qof kastaaba fursad ugu helo inuu soo bandhigo walaaciisa oo uu xalna u keeno.

- Waalidiinta iyo macalimiintu waa inay labaduba ogolaadaan inay ka qayb galaan si ay u qabsoonto dhexdhexaadintu.
- Kaqayb galuhu waxa uu dhex dhexaadinta iskaga tagi karaa marka uu doono.
- Waxa lagaga wada hadlay dhex dhexaadintu waa sir. Wixii laga dhax yiri madasha dhex dhexaadinta cadayn ahaan looma adeegsan karo wakhtiga dhagaysiga nidaamka socda ama wixii dacwad madani ah.
- Cida dhex dhexaadinaysaa go'aan masoo saari karto. Waalidiinta iyo degmada dugsigu waa inay labaduba ku heshiiyaan wixii laga wada hadlay.
- Waxa diirada lagu saarayaa in khilaafka la xaliyo oo laga shaqeeyo sidii loo keeni lahaa lad ay dhamaan dadka ka qayb galayaayi ku qabcaan.
- Waalidiinta iyo macalimiintu waxay isticmaali karaan dhex dhexaadin wakhtiga ala wakhtiga ah doonaan si khilaafkooda u xaliyaan.
- Hadafku waa in xal la helaa kaas oo buuxinaya baahiyada waxbarasho ee ilmaha.

## Faa'idooyinka Dhex Dhexaadinta

- Dhex dhexaadintu qof kasta waxay ka caawin kartaa sidii uu u fahmi lahaa aragtida tiisa ka gedisan.
- Kaqayb galayaashu waxay ka wada shaqeeyaan sidii xal loo keeni lahaa iyo natiijo la xakameeyay, halka cid aan ilmaha garanaynini ay go'aanka ka gaadhi lahayd.
- Dadku waa loo arkaa inay ku qabcaan oo ay u hogaan samaan qodobada lagu heshiiyay dhex dhexaadinta maadaama oo markii la samaynayay ay qayb ka ahaayeen.
- Khilaafka dhakhso ayaa loo xalin karaa marka la eego ikhtiyaarada kale ee khilaafka lagu xaliyo.
- Dhex dhexaadinta waxaa diira lagu saaraa in qorshe mustaqbal lasameeyo.

## Waxyaabaha Dhex Dhexaadinta lagu Tix Geliyo

- Dhex dhexaadinta mararka qaar waxay noqon kartaa mid caadifad hadhayso, lagu daalo, ama lagu dawakho.
- Waalidiinta iyo macalimiintu waxay dareemi karaan in laga gacan sareeyo hadii marka hore ayna si fiican iyaga oo degan ugu soo diyaar garoobin,
- Xaalado qaar muruqsan waxaa dhici karta inay u baahdaan madalo badan oo dhex dhexaad si heshiis waadix ah loo gaadho.
- Lama damaanad qaadi karo i dhex dhexaadintu horseedeysa in la iska afgarto heshiis qoran.

***Qofka dhex dhexaadinta samaynaya ee lagu tobobaray khidada dhex dhexaadinta wax ku oolka ah…***

- Waxa uu fududeeyaa wada hadalka furan ee kaqayb galayaasha dhex dhexaadinta.
- Samaynta deegaan badbaado ah.
- Waxa uu ku dhiiri geliyaa kaqayb galayaasha inay qadarin muujiyaan oo ay fahmaan dadka kale aragtidooda.
- Cadeeyaa qodobada lagu muransan tahay, oo waxa uu ka caawiyaa sidoo loo garan lahaa ikhtiyaarada kale, waxaanu ka caawiyaa qoriska wixii lagu heshiiyay.

## Suaalo Badanaa La Iska Waydiiyo Dhex Dhexaadinta

*Yaa dalban kara dhex dhexaadin?*

Waalidiinta ama shaqaalaha degmada dugsiga ayaa dalban kara dhex dhexaadin marka xidhiidhku adakaado ama marka uu jiro khilaaf aan la xalin karinini.

### *Goorma ayaan dalban karaa dhex dhexaadinta?*

Dhex dhexaadinta wakhtigii la doono ayaa la dalban karaa, xataa hadii aad hor eu dalbatay dhagaysi nidaamka socda ama cabasho qoraalka ah aad gudbisay.

### *Yaa dooranaya dhex dhexaadiyaha?*

Hay'adaada waxbarashada gobolka (state educational agencies, SEA) ayay tahay inay si nasiib ah, macquul ah, ama waxyaabo kale iyada oo ku salaynaysa inay doorato. SEA-yada qaar ayaa u ogolaaday inay waalidku ana dugsiyadu doortaan iyaga oo wada jirta dhex dhexaadiyaha. Dugsiyada ama waalidiintu kaligood ma dooran karaan dhex dhexaadiyaha kaligood.

### *Dhex dhexaadiyuhu go'aan miyuu gaadhaa?*

Maya. Dhex dhexaadiyuhu waxa uu fududeeyaa xidhiidha dhankana ma saaro waalidka ama degmada dugsiga. Dhex dhexaadinta waa nidaam lagu xaliyo mushkilada oo uu gadhwadeen ka yahay dhex dhexaadiyuhu.

### *Goorma iyo halkee ayay ka qabsoomaysaa dhex dhexaadintu?*

Dhex dhexaadintu waxay qabsoomi kartaa wakhtigii la doono goob ku munaasab ah oo waalidka iyo degmada dugsiguba iman karaan.

### *Mudo intee le'eg ayuu socdaa nidaamka dhex dhexaadintu?*

Dhex dhexaadinta waxaa loogu talo galay i si dhakhso ah loogu xaliyo khilaafka. Wakhtiga ay qaadanaysaa waxay ku xidhan tahay sida loo heli karo cida ka qayb galaysa, inta uu khilaafku le'eg yahay, iyo rabitaanka in la gaadho heshiis.

### *Yaa bixinaya kharashka nidaamka dhex dhexaadinta?*

IDEA waxa ay ku waajibisaa SEA inuu bixiyo nidaamka dhex dhexaadinta. Degmada dugsiga iyo waalidiinta toona waajib kuma aha inay bixiyaan kharashka dhex dhexaadinta.

### *Yaa kasoo qayb galaya dhex dhexaadiyaha?*

Waalidka, shaqaale ka socda degmada dugsiga, iyo dhex dhexaadiyada waa inay joogaan si ay dhex dhexaadintu u qabsoonto. Waalidka iyo dugsiga ayaa isla go'aainaya cida kale ee kasoo qayb galaysa dhex dhexaadinta, sida dad taageero ah. Dhex dhexaadiyuhu ayaa badanaa kasii caawiya kahor inta ayna bilaabmin madasha dhex dhexaadintu.

### *Ardaygu ma inuu kasoo qayb galaa dhex dhexaadinta?*

Waalidku waxa uu dooran karaa in ilmihiisa uu joogo dhamaan ama qayb kamid ah madalaha dhex dhexaadinta, taas oo ku xidhan da'da iyo garaadka ilmaha. Dhalinyarada qaar laxaadka la', waxaa dhici karta inay u wanaagsan yahay inay ka qayb galaan dhex dhexaadinta

taas oo ay ka baranayaan sida naftooda ugu ololayn lahaayeen. Tani si gaar ah ayay dhab usii tahay marka laga hadlayo hawlaha kala guurka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee mawduucan, *eeg Ka Qayb Galka Ardayda Dhex Dhexaadina Waxbarashadooda Gaarka ah, kaas* oo laga heli karo Websaytka CADRE: https://bit.ly/2KFV002

> **Shuruucda ururka goboleedyada IDEA nidaamkooda xalinta khilaafku uu kala duwan yahay.**
>
> **Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay la xidhiidhaan hay'adooda waxbarashada gobolka ama xarunta waalidka wixii macluumaad dheeraad ah.**

### *Looyar miyuu kasoo qayb galayaa dhex dhexaadiyaha?*

May cayimin IDEA in looyar kasoo qayb galo nidaamka dhex dhexaadinta. Ka qayb galka looyarka ee nidaamka dhex dhexaadintu way ku kala duwan yihiin goboladu.

### *Siday wax noqonayaa hadii dhex dhexaadinta waxba ka socon waayaan?*

Macluumaadka qaran ee la hayo waxa uu muujinayaa in 70% dhex dhexaadintu horseedo in heshiis lakala saxeexdo. Adeegsashada dhex dhexaadintu ma saamayso wixii kale ee xuquuq waalid ee uu ku siinayay IDEA. Waalidka weli waxa uu u gudbin karaa cabasho gobolka ama dalban karaa dhagaysuga nidaamka socda si loo xaliyo mushkilada.

### *Heshiska dhex dhexaadinta ma khasabaa inuu qoraal noqdo?*

Haa. Hadii khilaaf lagu xaliyo dhex dhexaadin, waa in heshiisku uu noqdaa qoraal. Waa in ay saxeexaan waalidka iyo cida fasaxa u haysata inay matasho degmada dugsiga. Heshiiska dhex dhexaadintu waa inuu qeexaa in dhamaan wada hadala qabsoomay intii lagu jiray nidaamka dhex dhexaadintu uu sir noqdaa. Waalidiinta waxaa dhici karta inay u baahdaan inay kala tashadaan looyar kahor inta ayna saxeexin heshiiska.

### *Siday wax noqonayaan hadii heshiiska sideeda loo fulin waayo?*

Heshiiska qoran ee dhex dhexaadinta ee saxeexani waa sharci waxaana dhaqan galiya maxkamada gobolka ama federalka. Hadii aad u aragto in heshiiskaagii aan la raacin, SEA-gaaga ayaa ku siinaya macluumaadka ikhtiyaarada kuu furan.

### *Siday wax noqonayaan hadii aan u baahanahay turjumaan?*

Waa muhiim inaad fahmi karto oo aad si buuxda uga qayb geli karta nidaamka dhex dhexaadinta. Qof kasta oo ku lug leh u sheeg inaad u baahan tahay turjumaan. La xidhiidh SEA wixii macluumaad dheeraad ah.

## Qaababka Aad Iskugu Diyaarin Karto Dhex Dhexaadinta

- Isku duba rido waraaqahaaga oo qor taariikhda oo qoraal ku dul qoro. Waxaad isku daydaa inaad samayso sadex nuqul - mid adigu aad haysato, mid aad cida kale siiso, iyo mid aad dhex dhexaadiyaha siiso.
- Liis garee waxyaabaha aad doonayso inaad ka hadasho iyo su'aalaha aad doonayso inaad waydiiso inta uu ay socoto dhex dhexaadintu. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad xasuusato cabashadaadii, si aad ugu soo badhigi karto qaab habaysan.
- Ka fikir wixii su'aalo ah ee ay ku waydiin karaan cida kale ee kasoo qayb gashay waxaanad qortaa wixii jawaabo ah ee macquul u noqonaya su'aalahoodaasi.
- Isku day inaad ka fikirto xalal kala duwan oo mushkilada ah oo qor.
- Ka fikir sida aad u qorshaysan lahayd sidii aad dareenkaada u xakamayn lahayd (kaaga iyo ka dadka kale) inta uu kulanku socdo.
- Isku day inaad wakhti yar kahor timaado wakhtiga kulanku bilaabmayo, si aad wakhti ugu hesho inaad usii diyaar garawdo ka qayb galkaaga.
- Waxay u badan tahay in dhex dhexaadintu ay horseedo in heshiis uu ka dhasho hadii dadka oo dhami si wanaagsan isku dhagaystaan oo ay is qadariyaan.
- U ololeeyaha waalidka yaa dhici karta inuu kaa caawiyo nidaamka dhex dhexaadinta. La hadal xarunta waalidka deegaankaaga si aad u ololeeye ula hadasho.

## Isha Macluumaadka Muhiimka ah

Liiska wakhtigan ee dhamaan xarumaha waalidka ee dalka oo dhan waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka Waalidka iyo Khayraadka (Center for Parent Information and Resources, CPIR): parentcenterhub.org/find-your-center
ama lahadal (973) 642-8100

Xarunta Xalinta Khilaafka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah (Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education, CADRE) waa xarun kaalmo farsamo oo qaran oo qalin khilaafka ah: cadreworks.org
ama lahadal (541) 686-5060

Macluumaadka ku saabsan Sharciga Waxbarshada Shakhsiga Laxaadka La' (IDEA) waxaa laga heli karaa onlayn ahaan:
https://sites.ed.gov/idea/

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xalinta khilaafka waxbarashada gaarka ah iyo ikhtiyaarada xalinta khilaafka waxaa ka heleysaa IDEA, booqo Websaytka CADRE: cadreworks.org

## Hel Macluumaadka Lagala Xidhiidhayo Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

**Region 1 Parent TA Center**
NJ Statewide Parent Advocacy Network
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100
Faakis: (973) 642-8080
Websayt: spanadvocacy.org

**Region 2 Parent TA Center**
Exceptional Children's Assistance Center
907 Barra Row, Suites 102/103
Davidson, NC 28036
Taleefan: (704) 892-1321
Faakis: (704) 892-5028
Websayt: ecac-parentcenter.org

**Region 3 Parent TA Center**
Parent to Parent of Georgia
3070 Presidential Pkwy, Suite 130
Atlanta, GA 30340
Taleefan: (800) 229-2038
Faakis: (770) 458-4091
Websayt: p2pga.org

**Region 4 Parent TA Center**
WI FACETS
600 W. Virginia St., Ste. 501
Milwaukee, WI 53204
Taleefan: (877) 374-0511
Faakis: (414) 374-4655
Websayt: wifacets.org

**Region 5 Parent TA Center**
PEAK Parent Center
611 N. Weber, Suite 200
Colorado Springs, CO 80903
Taleefan: (800) 284-0251
Faakis: (719) 931-9452
Websayt: region5ptac.org

**Region 6 Parent TA Center**
Matrix Parent Network & Resource Center
94 Galli Drive, Suite C
Milwaukee, WI 94949
Taleefan: (415) 884-3535
Faakis: (415) 884-3555
Websayt: matrixparents.org

**Center for Parent Information and Resources (CPIR)**
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100 Faakis: (973) 642-8080
Websayt: parentcenterhub.org

## Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

---

ADRE waxay waraaqa u diyaarisaa si waafaqsan xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Heshiika Xafiiska Isku Duwida Baraamijyada Waxbarashada Gaarka ah Lam. H326D080001. Tina Diamond, oo haysata shahaadada Ph.D., waxey eheyd sargaalka mashruuca. Afkaarta halkaan lagu shaaciyay mamathalayaan go'aanka Waaxda Waxbarashada ama TSharciyadeeda. Majirto ogolaansho guud ooy bixisay Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka oo ku saabsan wax soo saar wuxuu ka ahaado, adeeg, ama ganacsi lagu xusay daabacaaddaan ama lagu ogolaado gabagaba ahaan. Waxsoo saarkaan waxey kujirtaa bandhigga bulshada. Ogolaanshaha lagu soo saaraaya guud ahaan ama qeyb ka mid ah waa laogolaaday. Inkastoo ogolaansho dib loogu daabaco aan loo baahneyn, waxa lasoo qaadanaayo waa inuu ahaado: CADRE (2014). Dhex dhexaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA, Eugene, Oregon, CADRE. Daabacaada waxaa sidoo kale kamid ah linkiyo iyo Cinwaano Websayto (URLs) ay sameeyeen oo ay gacantana ku hayaan hay'ada madax banaan oo loogu soo geliyay si ay akhristayaashu u heli karaan. Waaxdu kama masuul ah saxnimada macluumaadkan. Hawsha wax kamid ah ayaa hore loogu diyaariyay iyada Kaalmo Farsamo oo LAKAASHANAYO Xarumaha Waalidka. Taariikhda Daabacaada: Janaayo 2014 .